



Dheelitirka isdiiwaangalinta dugsiyada Peninsula, Chief Joseph iyo Ockley Green

Guddida Talo-bixinta Dib-u-eegista Xuduudaha Dugsiyada Degmada(DBRAC) ee la sameeyey sandkii 2014 sidii ay gacan uga geysan lahaayeen dheelitirka isdiiwaangalinta dhammaan Dugsiyada Dadweynaha Portland. Hawlihii ugu dambeeyey ee ay dhawaan guddidu ay ku hawlanaayeen ayaa waxay kagab bilaabeen in ay soo jeediyaan labo doorasho, si ay u wax uga qabtaan iskuulkan Chief Joseph ee tiradiisu ka badatay intii loogu talagalay iyadoo la xoojinayo diiwaangalinta iskuulka Peninsula oo bilaabmaysa sanad-dugsiyeedka 2017-2018. Bisha Janaayo 30keeda, 2017, Guddoomiyaha Waxbarashada ee ku-meel gaar ahi wuxuu taageeray mid ka mid ah soo-jeedintii guddida DBRAC.

Soo-jeedintu si ay u meel marto waxay u baahan tahay ansixinta Golaha Guddoonka Waxbarashada, waxaanad ka fiiri kartaa halkan, www.pps.net/dbrac.

Soo jeedinta Guddida DBRAC:

Tallo-soo-jeedinta Guddoomiyaha Waxbarashada ee Ku-Meel-Gaarka ah wuxuu raacsan yahay inay lagama maarmaan tahay in isbedel lagu sameeyo Iskuulada Peninsula iyo Chief Joseph, taasi oo Chief Joseph laga dhigayo halkuu uu ka ahaa Dugsi Hoose K-4 inuu noqdo K-5, fasalkii 5naadna laga saaro Dugsiga Ockley Green taasi oo ku soo celinaysa inuu noqdo marka la qaabeeyo Dugsi Dhexe oo ka bilaabma fasalada 6aad ilaa 8aad.

Haddii soo jeedinta la ansixiyo, hirgalinta Dugsiga Dhexe ee Ockley kaasi oo markii hore la furay bishii Ogosto 2016 ee sanadkii tagay, wuxuu noqon doono mid dhammeystiran. Intaas waxa dheer, Dugsiyada Beach, Peninsula iyo Woodlawn iyagana dib ayaa loo qaabeeyey oo halkii ay ka ahaayeen K-8 waxay noqon doonaan K-5 dugsiyo hoose sanad-dugsiyeedkan si ay qeyb uga noqdaan nidaamka dheelitirka diiwaangalinta. Waqtigan xaadirka, ma jiri doonto wax isbedel dheeraad ah oo lagu sameynayo dugsiyada Beach ama Peninsula.

Waa maxay macnaha ay ugu fadhido ardeyda

Haddii la ansixiyo, Peninsula K-5 wuxuu dugsi hoose u noqon doonaa ardeyda xannaanada cusub ee imanayo ee cinwaanada ay ku nool yihiin u dhexeeyaan dariiqa weyn ee I-5 iyo jidadka Brandon/Delaware, waqooyiga Columbia Slough iyo Koonfurta dariiqa Lombard. Soo jeedintani waxa kale oo raad ku yeelanaysaa ardeyda cusub ee fasalada kale ee ku nool nawaaxigani. Haddii la ansixiyo isbedelada lagu sameynayo soo jeedinta waxay bilaabmi doontaa bisha Ogost ee sanadkan 2017. Gaadiid ay ardeydu raacaan waa la siin doonaa ardeyda ku nool masaafad u jirta iskuulka hal mayl ama wax ka badan Iskuulka Peninsula. Wixii macluumaad ah ee ku saabsan Iskuulka Peninsula waxaad booqataa shebekadani, www.pps.net/peninsula.

Dugsiga Dhexe ee dariskani wuxuu noqon doonaa Ockley Green, iyadoo Dugsiga Sarena ay ardeydu yeelan doonaa inay iyagu doortaan inay iska diiwaangaliyaan Roosevelt ama Jefferson-Middle College for Advanced Studies.

Tallaabooyinka kuwan xigga

Waxaad xaq u leedahay inaad taageerto ama aad soo jeediso dareenkaaga ku saabsan hindisahani adigoo u soo dirayo Guddida Golaha Waxbarashada email ama warkaaga ka dhiibanaya shirkada Guddida Golaha Waxbarashada ee soo socda, **501 N. Dixon St., Portland, OR 97227**.

Febraayo 6, 2017, 6 fiidkii – soo jeedintii caadiga aheyd ee hindisaha

Febraayo 13, 2017, 5fiidkii – Goluhu tallaabo ayuu ka qaadaya hindisaha

Si aad uga qeybqaadato inaad ra'yi ka darsado shirka Guddida Golaha Waxbarashada waxaad soo wacdaa (503) 916-3906 ama email Chusonqu@pps.net ka hor taariikhaha shirka si meel laguugu soo qabto.

Su'aalaha ku saabsan hindisaha waxaad soo wacdaa: 503-916-3205. Khadka Luqada Afsoomaliga (503)-916-3586.

Dabayaaqada sanadkani, Guddigii tallo-soo-jeedinta ee DBRAC waxay bilaabi doonaa inay eegaan in isbedel lagu sameeyo xudduddo dheeraad ah; iyadoo barnaamijyadana loo rarayo sanad-dugsiyeedka 2018-2019, si ay qeyb uga noqdaan furitaan dugsiyada dhexe ee Harriet Tubman iyo Roseway Heights. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay idin wargelin doontaan haddii in uun la soo jeediyo isbedelo cusub oo ku imanaya Ockley Green ama iskuulada ay ardeydu uga yimaadaan.

